

## LAMBARADA TALEEFOONO MUHIIM AH

### Xafiisyada Maxkamadaha Madaniga ah ee Dhexdhexaadinta

Anoka	763-422-7376
Carver	952-361-1420
Dakota (Hastings)	651-438-8234
Ramsey	651-266-8230
Scott	952-496-8200
Washington	651-430-6264

### Lambaro Kale:

Secretary of State 651-296-2803  
(Xoxhayaha Gobolka)

MN Dept. of Motor Vehicles 651-296-6911  
(Qeybta Gaadiidka ee MN)

District Court Civil 612-348-3164  
(Maxkamadda Degmada ee Madaniga ah)

Lawyer Referral Service 612-752-6666  
(Adeegga La Xiriirka Qareenada)

Volunteer Lawyers Network 612-752-6677  
(Isku Xirka Qareenada Mutadawiciinta)

Hennepin County Sheriff 612-348-3800  
(Ciidamada Nabadgelyada ee Degmada Hennepin)

Henn. Co. Property Tax ID 612-348-3011  
(Waaxda Canshuurta ma Guurtada ah Degmada Hennepin)

## SIDA LAGU TAGO XARUNTA MAAMULKA MAGAALADA EE MPLS) MINNEAPOLIS CITY HALL

Qofka ka imanaya woqooyi I-94:  
Ka bax 4th Street – (waddo hal dhinac u socota )  
ilaa aad gaarto 3rd Avenue, daarta City Hall waa midigtaada.

Qofka ka imanaya koonfur:  
35W oo woqooyi u socda kuna socda faras nmagaalaha/kaga bax 5th Avenue. Bidix ula laabo 5th Street, soco hal seked, daarta City Hall waa midigtaada.

Ka imanaya bari:  
I-94 kaga bax 5th Street. Ku soco illaa aad gaarto 4th Avenue, daarta City Hall waa midigtaada.

Ka imanaya galbeed I-394:  
4th Street –(waddo hal dhinac u socota). Isticmaal isla jihadii markaa waqooyi ka imanaysay.

### Parking Ramps (Meelaha Gaadiidka la Dhigto)

Government Center Ramp  
415 South 5th Street  
(ka soo gal 5th Ave-lane-ka bidixda ah)

Jerry Haaf Ramp  
424 South 4th Street  
(ka soo gal 5th Ave-lane-ka bidixda ah)

Gateway Municipal Parking Ramp  
400 South 3rd Street  
(ka soo gal 4th Ave-lane-ka bidixda ah)

Waxaa kaloo jira mitiro la dhigto iyo barxado la dhigto oo ku yaal meesha dhexdeeda.

## FOURTH JUDICIAL DISTRICT MAXKAMAD-DEGMADA HENNEPIN WARBIXINTA GUUD EE CONCILIATION COURT



### Xafiiska xoghaynta (Clerk's Office) - Magaalada Hoose ee Minneapolis

Qolka 306 Minneapolis City Hall  
350 South 5th Street  
Minneapolis, MN 55415-0926  
612-348-2713



Hennepin County si siman ayey u siisaa shaqo, barnamijyada iyo adeegyada ay dadku codsadaan iyada oo aan lo eegin jinsiyadda, midabka, caqiidada, diinta, da' da, lab iyo dhiddig, naafada, xaaladda guurka, doorashiisa jinsiga ah (cidda uu galmo lala yeelanaayo lab iyo dhiddig), haddii uu qaato gargaarka bulshada, ama asalka wadanka uu qof ka soo jeedo. Haddaad rumaysan tahay in lagu takooray, la xiriir Administration Division of Human Resources and Employee Relations Department, A-400 Government Center, Minneapolis, MN 55487, 612-348-3562, or TTY 612-348-3770.

July 15, 1999 Hennepin County, MN

Hadii aad u baahantahay turjubaan, dhakhso u wac Xafiiska xoghaynta oo talefoonkoodu yahay 612-348-2713 laakiin mudadu yaysan ka yaraan 48 saac ka hor marka maxkamaddaada la dhagaysanaayo.

Wixii warbixin dheeraad ah iyo foomam booqo bogga:  
<http://www.courts.state.mn.us/districts/fourth>

# HAGE KOOBAYA MAXKAMADDA DHEXDHEXAADINTA

Warbixinta ku qoran warqadahan looguma tala gelin in ay noqoto tala xagga sharciga ah balse waa hage guud oo kuu faahfaahinaaya nidaamka sharciga. Haddaad qabto su'aalo aan ahayn kuwa sharci, fadlan kala xiriir Maxkamadda dhexdhexaadinta Tel. 612-348-2713. Foomamka aan warqadahan ku sheegnay badankood waxaa laga helaa maxkamadda oo ay ka mid yihiin xafiisyada darfaha magaalada.

Maxkamadda dhexdhexaadinta waa . . .

Aan rasmi ahayn, qaali ahayn oo lagu dacweeyo qof kale, hay'ad, urur ama shirkad.

Lacagta diiwaan gelintu waa . . .  
tahay ama ka yar tahay \$7,500.00

\$55.00 waxayna qaadaa dacwooyinka lacagta la isku hasytaa

Sababaha dacwaddaada aad ugu gudbinayso Maxkamadaha dhexdhexaadinta

## DACWOYIN LA AQBALI KARO

libin alaab halaysan ama adeeg

Jeeg aan qiimo lahayn

Waxyeello loo geystay hanti ama baabuur

Deebaajiga Waxyeello oo aan la celin

Kirada wakhtigeedii dhaafay oo aan la bixin

Mushar aan la bixin

Kharaj dayactir ee uu shil keenay oo aan la bixin

Celin Hanti (Replevin)

## DACWOYIN AAN LA AQBALI KARIN

Lahaanshaha hanti ma guurto ah

Sumcad ka xumayn/dacwad dhaleecayn/Kadeed

Dacwooyinka midab takoorka/jinsiyadda

Qof qasab ku heysasho

Khalad dhinaca caafimaadka ah oo lagugu sameeyay

Dacwad Kooxeed

Talaabooyin laga qaadayo qof dhintay

Talaaboyin laqaado iyadoo maxkamad kale ku jirto arrinta

Goormaa laga diiwaan gelinayaa Degmada Hennepin

Guud ahaan, waa in aad dacwaddaada ka xareysaa degmada uu ku nool yahay qafka aad dacwayneysid. Haddii aad dacwaynayso ganacsi, waa in aad dacwada ka xareysaa xafiiska ama laanta ganacsigu degmada uu ku yaal.

Waxyaabaha kuwaas ka baxsan waxaa ka mid ah:

- dacwadda jeeg aan qiima lahayn waxaa laga diiwaan gelinayaa meeshii wax lagu kala gatay
- dabaajiga damaanadda iyo dacwooyinka ijaaraha waxaa laga diiwaan gelin karaa degmada ay ku taal hantida la ijaaray
- dhawr jawaabe , hadii uu hal jawaabe ku nool yahay Hennepin County
- Shirkadaha dibedda ama Gudaha ee ku leh wakiil uga adeega Hennepin County (la tasho Secretary of State at 651-296-2803)
- eeg xeerka Xeerka Minnesota 491A waxyaabaha kale oo ka baxsan

Warbixinta loo baahan yahay si loo diiwaan geliyo dacwad

Codsde (kan dacwaynaya)

Magaca Cinwaanka

Nawaaxiga Taleefoon Maalinimadii

Maalinta dhacdada/shilka/wax kala gadashada

Tirada lacagta

Jawaabe (kan la dacwaynayo)

Magaca Cinwaanka **Maya PO Boxes**

Nawaaxiga

Jawaabe wuxuu ku nool Hennepin County, waxyaabo

qaarkood maahee.

Haddii uu qof yahay, magaca oo buuxa waa in la helaa.

Ku qor waradda dacwadda xoogaa sifayn ah wixii dhacay. Dhegaysiga maxkamaddaada ayaad faahfaahin doontaa, marka la imow cadaymahaaga maalinta maxkamadda aad leedahay. Wax dukumiinti ah ha ku lifaaqin dacwaddaada.

MAXAA DHACAYA MARKII AAD HESHO WICID

MAXKAMADEED

Tan macnaheedu waa in lagu dacweeyay. Waxaa tahay ka jawaabaha dacwadda; waa in aad isu diyaarisaa dhegaysiga maxkamadda. Hadday kula tahay in codsade uu lacag kaa qabo waxaad samayn kartaa dacwad liddi ku ah. Haddii aadan imaan maxkamadda waxaa laga yaabaa in garsooruhu uu kugu xakumo lacagta lagu weydiisanayo adigoo aan joogin.

**SIDA MAXKAMADAH DHEXDHEXAADINTA LOOGA DIIWAN GELIYO DACWAD LIDDI KUGU DAWADAD LAGUGU SOO OOGAY**

Waa in aad diiwaan gelisaa dacwadda ka horjeeda ugu yaraan shan maalmood ka hor maalinta dhegaysiga. (Sabti, Axad, Fasaxyada, iyo maalinta dhegaysigu kuma jiraan). Foomka dacwadda waxaa laga helaa Maxkamadaha dhexdhexaadinta. Waa in aad bixisaa lacagta diiwaan gelinta. Maxkamadaha dhexdhexaadinta ayaa ogaysiinaysa codsade haddii la diiwaan geliyo dacwad ka hor jeeda. Haddii cinwaanka ku yaal dacwadii hore uusan ahayn midka saxa ah, adigaa ka mas'uul ah in aad maxkamadda siiso cinwaan kaaga buuxa oo saxa ah.

Haddi dacwaddaada ka horjeeda tan kale ay ka badato xadka sharcigu ogol yahay ee ah \$7,500, waa in aad dacwaddaada raacsiisaa \$55 oo lacagta xareynta dacwadda ah iyo qoraal maragkac ah oo sheegaya (1) In ay tani tahay dacwad lid ku ah isla midda lagugu soo oogay, (2) iyo in ay ka badan tahay inta sharcigu ogol yahay, iyo (3) in aad talaabo lid ku ah codsade aad u gudbisay Maxkamadda Degmada ama u gudbin doonto 30 maalmood gudahood. Haddii 30 malmood gudahood aad talaabo ka qaadi weydo, codsade dacwaddiisa dib baa loo furi karaa.

**HADDII AAD TAHAY JAWAABE AADNA AAMINSAN TAHAY IN CID KALE AY MAS'UUL KA TAHAY KHASAARAH GAARAY CODSADAH**

Haddii aad rumaysan tahay in khasaaraha gaaray codsade cid kale ay mas'uul ka tahay, qofka kale ayaa dacwad ka qori kartaa adiga oo maxkamadda weydiisanaya in dacwadaha oo dhan mar la wada dhegaysto. La xiriir xafiiska xoghaynta maxkamadda wixii warbixin intaa ka badan.

**SIDEE DIB LOOGU DHIGAA AMA MARKALE LOO QABTAA MAALINTA MAXKAMADDA**

Haddii aadan iman karin maalinta maxkamadda, si degdeg warqad u soo dir Maxkamadaha dhexdhexaadinta. Warqadda waa in laga helaa lambarka dacwadda iyo sababta aadan u iman karin dhegaysiga, waana in uu xafiiskayagu helaa ugu yaraan 5 malmood ka hor maalinta dhegaysiga (Sabti, Axad, fasaxyada, iyo maalinta dhegaysigu kuma jiraan). Dhinac walba wuxuu xaq u leeyahay hal mar oo dib loogu dhigo, kharaj (illaa iyo \$50) ayay kuugu kici kartaa marar kale oo dib loo dhigo.

**SIDA LA ISUGU DIYAARIYO DHEGAYSIGA**

Dhegaysiga Maxkamadaha Dhexdhexaadinta waa mid aan rasmi ahayn, balse waa in aad diyaar u noqotaa in aad dacwaddaada muujiso. **Cadaymaha waxaa la ogolaanayaa marka dhegaysigaaga oo kali ah.** Qareen waa la ogol yahay hase yeeshee waxay ka qayb qaadan karaan inta uu garsooruhu ogolado. Markhaatiyada waa in ay joogaan ayna marag furaan iyagoo dhaartay. Waraaqo la soo qoray iyo dhaar qoraal ah garsooruhu waa ogolaan karaa waana diidi karaa. Haddii qof markhaati ahi uusan rabin in uu yimaado, waxaad isticmaali kartaa u yeeris maxkamadeed. U yeerista waxaa laga heli karaa Maxkamadaha dhexdhexaadinta waana lacag.

Waa in aad keentaa wixii cadayma ha oo dhan, sida lacag qabasho, lacag wax lagu dayactiray, qiimayn iyo wixii kale ee la xiriira dacwadda maalinta dhegaysiga maxkamadda. Waxaad kale oo u yeeris u dalban kartaa dukumiinti dacwaddaada la xiriira oo qof kale hayo laakiin uusan rabin in uu ku siiyo. Waa in aad diyaarsataa liis ah xaqiiqda aad hor keenayso maxkamadda intaadan maxkamadda aadin. U agaasim si fiican waxaad maxkamadda hor keenayso si dacwaddaadu u cadaato una dhamaato. Soo koob taabana dulucda hadalka.

**MARKII QOF IMAN WAAYO DHEGAYSIGA**

Haddii aad tahay codsade oo aad iman weyso dhegaysiga, **jawaabena yimaado**, dacwaddaada waa la tuurayaa, macnaheedu waa kiiska waa lagaaga adkaaday. Haddii dacwo ka soo horjeeda taada la diiwaan geliyay waxaa laga yaabaa in lacag lagugu xukumo. Haddii aad tahay codsade oo aadan iman dhegaysiga jawaabena iman dhegaysiga kiis kaaga waa laga saarayaa jadwalka, waana in aad dib u dalbataa dacwo hor leh.

Haddaad tahay eedeysane oo aadan iman dhegaysiga **codsadane yimaado**, adigoo maqan ayaa lagugu xukumi karaa lacagta oo dhan, wixii dacwad ka horjeeda taasna waa la tuurayaa. Haddii aad tahay jawaabe oo aadan iman **codsadane iman** kiiska waa la baabi'inayaa. Codsade dib ayuu u diiwaan glin karaa dacwo hor leh.

**Maxaa dhacaya dhegaysiga maxkamadda ka dib**

Caadi ahaan, garsooruhu go'aan ka gaari maayo wakhtiga dhegaysigaaga. Todobaad ka dib markii go'aan la gaaro ayaa boostada lagu soo dhigayaa Ogaysiis Xukun. Maalinta iyo saacadaha ku qoran ogaysiiska ayuu xukunku dhacay.

**Si taxada leh u akhri dhamaan ogaysiisyada iyo tilmaamaha.**